



JAMHUURIYADDA SOMALILAND
KOMISHANKA MAAMUL-WANAAGA
(KMW)



WARBIXIN KOOBAN OO KU SAABSAN KULANKA DOORKA HAWEENKA EE WACYIGALINTA MAAMUL-WANAAGA

SEPTEMBER, 2021



Sawirka Guud Ee Kaqayb-galeyaasha Kulanka iyo Madaxda KMW

**Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda
Wacyigalinta Ee KMW**

Website: www.ggc.govsomaliland.org

(Warbixin Kooban)

MAHADNAQ

Komishanka Maamul-wanaagga (JSL) wuxuu u mahadcelinayaa Ururada haweenka, Jaamacadaha iyo hay'addaha Xukuumadda ee ajiibay martiqaadkii Komishanka Maamul-wanaaga ee ahaa inay haween hawlkar ah u soo diray kulanka Doorqa Haweenka Ee Wacyigalinta Maamul-wanaaga oo qabsoomay 22kii bishii September, 2021. Waxa kale, oo Komishanku si weyn ugu mahadcelinayaa dhamaan masuuliyiintii ka socday wasaaraddaha dalka, ururada haweenka iyo Jaamacadaha dalka, kuwaas oo hadalo muhiim ah ka jeediyey furitaanka kulanka.

Ugu dambayna, Komishanka Maamul-wanaaggu wuxuu u mahadcelinayaa haweenkii ka soo qayb-galay kulanka iyo sidii wanaagsanayd ee ay uga qayb-galeen dooda iyo falanqaynta doorqa haweenka ee wacyigalinta maamul-wanaagga, waxaanu leenahay garashadiinu aad bay u qiimo badnayd, waxayna wax-weyn ka tari doontaa qaabaynta nidaam wanaagasan oo loo maro wacyigalinta maamul-wanaaga ee uu hogaaminayo Komishanka Maamul-wanaaga JSL.

Xuquuqda daabacaada warbixintan waxa iska leh Komishanka Maamul-wanaaga Somaliland. Waxaan warbixinta oo dhamaystiran laga heli karaa Waaxda Wacyigalinta ama Mareegta Komishanka. Warbixintan waxa diyaariyey, naqshadeeyey oo qaabeeyey Waaxda Wacyigalinta Ee Komishnaka Maamul-Wanaaga.

© Komishanka Maamul Wanaaga 2021

Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda Wacyigalinta Ee KMW

Website: www.ggc.govsomaliland.org

1. WARBIXINTA OO KOOBAN

Dawladda Somaliland iyo shacbiga waxay ogsoon yihiin in Musuq-maasuqa iyo Daah-furnaan la'aanta hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ay si weyn u curyaamiyaan horumarka iyo xasiloona dalka, Sidaas darteedna, Komishanka Maamul -wanaagga waxaa waajib ku ah inuu kor u qaado wacyigalinta dadweynaha iyo dhammaan hawl-wadeenada dawladda si waxqabadka Xukuumaddu u noqod mid guulaysta.

Maadaama oo ay Wacyigalinta Maamul-wanaagu tahay xaq-dastuuriya oo ay bulshadu uga baahan tahay Dawladda, Komishanka Maamul-wanaaga ay waajib ku tahay inuu dhamaan hay'addaha dawladda iyo bulshadaba ku wacyigaliyo habka iyo hanaanka maamul-wanaaga si ahmiyad weyn loo siiyo xoojinta wada-shaqaynta hay'addaha Qaranka iyo Bulsho-weynta Somaliland, ayey Waaxda Wacyigalinta iyo Xidhiidhka Dadweynaha Ee E Komishanka Maamul-wanaaga (KMW) qabtay kulan lagu gorfeyey **DOORKA HAWEENKA EE WACYIGALINTA MAAMUL-WANAAGA QARANKA.**

Kulankan ku qabsoomay Hudheelka Baraar Ee Caasimada Hargaysa 22kii September, 2021, ayaa waxa ka soo qayb-galay ku dhawaad 45 Haween ah oo ka kala socday, Waaxyaha Xidhiidhka Dadweynaha ee Wasaaraddaha/Hay'addaha Dawladda, Jaamacadaha ay ka mid yihiin; Hargeisa, Gollis, New Generation, Admas, Alpha, Frantz Fanon, Adna Aden iyo Machadka Tababarka Shaqaalaha Dawladda iyo Ururada ka shaqeeya arimaha haweenka, sida Ururka Haweenka Ee Now Ururka Nagaad, Ururka Qareenada Haweenka, Ururka Suxufiyiinta Haweenka iyo ururka dhalinyaradda Somaliland ee SONYO.

Kulankan ayaa si qoto-dheer loogu gorfeyey doorka haweenka ee wacyigalinta maamul-wanaaga, waxaana furay Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga, Mudane **Dayib Aaden Xaaji Cali**

(Warbixin Kooban)

isagoo faahfaahiyey ujeedada kulankan ay ka leeyihiin, xusayna in Haweenku ay yihiin udub-dhexaadka bulshada, ayna muhiim u tahay Komishanka Maamul-wanaaga in Haweenku ay kaalinta koowaad kaga qaataan la-dagaalanka Musuqmaasuqa iyo sare-u-qaadidda Maamul wanaagga. Wuxuu intaa ku daray inay muhiim u tahay in dhammaan daneeyayaasha arrimaha maamul-wanaagu inay si wadajir ah uga wada-shaqeeyaan sidii loo horumarin lahaa hanaanka dawlad-wanaaga qaranka.

Agaasimaha Waaxda Wacyigalinta, Mudane, **Muuse Cabdilaahi Muxumed** ayaa sharaxaad ka bixiyey sidii bulshada loo fahamsiin lahaa maamul-wanaagga la doonayo in uu Somaliland ka taabba-galo si bulshada Somaliland ay u hesho adeeg hufan. Gabagabadii, haweenkii ka soo-qayb-galay kulanka ayaa soo dhoweeyay dadaalka ballaadhan xukuumaddu ku hirgalinayso maamul-wanaaga iyagoo tilmaamay in arrintaasi lagu heli karo siyaasad hufan iyo isla-xisaabtan, sidoo kalena dadweynaha ugu baaqay inay dowladda kala shaqeyan hirgelinta hawshaas.

2. UJEEDDOOYINKA IYO HABRAACA

- Maadaama oo ay haweenku yihiin udub dhexaadka Bulshada, kaalinta ugu horaysana kag jiraan kor-uqaadid Maamul-wanaaga iyo yaraynta Musuqa, ayaa ujeedada kulankani ahayd sidii loo ifdiimin lahaa doorka haweenka ee wacyigalinta maamul-wanaaga iyadoo la xoojinayo wada-shaqaynta Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ururada haweenka Jamhuuriyadda Somaliland.
- Waxa kale oo ujeeddadeedu ahayd in laga wada hadlo sidii haweenka Somaliland, guud ahaan, ay ugu baraarugi lahaayeen maamul -wanaagga iyo waddaniyadda si loo helo bulsho iyo dawlad dhiirigelisa hirgelinta mabaadiida maamul -wanaagga.
- Habraaca kulanka waxa ka mid ahaa Waaxda Wacyigalinta oo macluumaad la xidhiidh doorka haweenka ee wacyigalinta maamul-

Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda Wacyigalinta Ee KMW

Website: www.ggc.govsomaliland.org

wanaaga iyo xoggo khuseeya Komishanka u soo bandhigtay, ka qaybgaleyaasha. Waxa kale oo ka mid ahaa hadalo ay jeediyeen masuuliyiintii ka soo qayb-galay kulanka iyo falanqayn ay soo jeediyeen ka qayb-galeyaashu.

3. GUUDMAR

Komishanka Maamul Wanaaga waa Komishan Madaxbanaan oo lagu aasaasay Xeer No: 58/2012. Waxa loo abuuray inuu toosiyo hanaanka Maamulka Hay'adaha dawladda Somaliland, isla markaana uu ka hortago, lana dagaalamo in musuqu ragaadiyo dhaqaalaha iyo horumarka dalka. Haddaba, Komishanka qorshihii 2021, waxa ka mid ahaa; inuu qaban-qaabiyo Kulan ku saabsan Doorka Haweenku ka qaadan karaan Wacyigalinta Waamul-wanaaga iyo in Bulshada laga wacyigaliyo Maamul-xumadda iyadoo la adeegsanayo haweenka iyo Ururadooda. Waxa la ogsoon yahay in dimuqraadiyadda caafimaadka qabtaa ay ku dhisan tahay tiirarka maamul-wanaaga, oo haddii si sax ah loo adeegsado, laguna wacyigaliyo bulshada iyo u-adeegeyaasheeda, in si haboon kor loogu qaadi karo dawlad-wanaagga dalka.

Sidaa darteed, Dawladda Somaliland waxa ka go'an hagaajinta hanaanka Maamulka ee dhamaan hay'addaha qaran, iyadoo lagu wacyigalinayo tiirarka maamul-wanaaga iyo xeerarka dalka, si horumar looga gaadho arimaha isla-xisaabtanka iyo banyaalnimada. Xukuumadda Somaliland waxay aaminsan yahay in qof kastaa uu qaadi karo talaabo si weyn ama si yar oo uu ku xakamaynayo Maamul-xumadda kuna xoojinayo dhaqanka hufnaanta iyo isla-xisaabtanka ku dhisan.

Waxaan wada-ogsoonahay in haweenka Somaliland ay wax weyn ka qabteen aasaasidda nabadda, xasilloonida iyo horumarka uu dalku gaadhay, oo aan la'aantood lagu guulaysteen arimaha aan soo sheegnay. Waxa kale oo aan la dafirikarin in haweenka Jamhuuriyadda

Somaliland ay kaalin muhiim ah ku leeyihiin waddaniyadda, maamul -wanaagga, kobcinta dhaqaalaha, yaraynta musuqmaasuqa iyo wacyigalinta dadweynaha. Haddaba, muddooyinkii u dambeeyay, Xukuumadda Somaliland waxay kordhisay doorka haweenku ku leeyihiin maamul -wanaagga, waddaniyadda iyo doorka ay ku leeyihiin wacyigalinta dadweynaha, taas oo keentay in Haweenka Somaliland guulo ka gaadhaan arimo badan oo dhinaca horumarka, waxaana guulahaas u horseeday xaaladda Maamul-wanaaga ee ka hanaqaaday Somaliland.

4. XIDHITAANKA KULANKA

Ka qayb-galeyaasha kulanku waxay yeesheen dood muhiim ah iyagoo codsaday in kulamada noocan oo kale ah ay Komishanka Maamul-wanaagu badiyaan. Waxay hoosta ka xarriiqeen in haweenku yihiin laf -dhabarta bulsho kasta, sidaas darteedna, ay door weyn ku leeyihiin la -dagaallanka musuqmaasuqa iyo dhiirrigelinta hufnaanta iyo isla -xisaabtanka. Haweenkii, ka soo qayb-galay kulanku waxay uga mahadceliyeen Komishanka Maamul-wanaaga qaban-qaabada kulankii ugu horeeyey ee Komishanka iyo Haweenku yeeshaan, iyagoo balan-qaaday in Ururada Haweenku ka la-shaqayn doonaan Komishanka arimaha Wacyigalinta Bulshada.

Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga Somaliland, Mudane, **Dayib Aadan Xaaji Cali** ayaa soo xidhay kulankan oo socday muddo hal maalin ah. Waxaanu si balaandhan ugu mahadceliyey qeybgalayaasha kulanka oo dadaal muujiyey intii uu socday kulanka. Waxaanu ku booriyey inay sii wadaan wada shaqeynta ay la yeelanayaan Komishanka Maamul-wanaaga, si wacyigalin dhamaystiran loo sameeyo.

Gudoomiyuhu wuxuu ku nuuxnuuxsatay muhiimadda ay leedahay inay Haweenku doorkooda ka qaataan wacyigalinta bulshada ee arimaha maamul-wanaaga iyo waddaniyadda, waxaanu ka codsaday ka qaybgalayaasha inay si dhow ula shaqeeyaan xafiisyada Maamul-

wanaaga. Ugu dambayntiina, gudoomiyihu wuxuu balan-qaaday inay xoojin doonaan wacyigalinta maamul-wanaaga oo ay qaban-qaabin doonaan kulamo wada-tashi oo ay ka qayb-galaan dhamaan bulshada iyo masuuliyiinta xukuumadduba

5. TALOOYINKII KA SOO-BAXAY KULANKA

Kulanka Dooraka Haweenka Ee Wacyigalinta Maamul-wanaagu wuxuu diirada saaray in Haweenku ay yihiin laf-dhabarta bulshada ee dhamaan hawlaha nololaha. Kaqayb-galeyaasha kulanku waxay dood iyo falanqay ka yeeshen arimo badan oo ay ugu mudnayd, dooraka Haweenku ka qaadan karaan wacyigalinta maamul-wanaaga, qaabka ay Haweenku ula dagaalamaan musuqa gaar ahaan; goobaha dawladda ee ay ka shaqeeyaan.

Ugu dambayn, ka-qaybgalayaashu waxay isku raaceen in Komishanka Maamul-wanaagu hirgaliyo qodobadan hoose ku qoran:-

1. Komishanka Maamul-wanaagu waa inuu xoojiyo hawlaha wacyigalinta ee Kor-loogu qaadayo hanaanka maamul ee hay'addaha dawladda, iyadoo loo qabanayo kulamo intan ka badan.
2. In la xoojiyo Xidhiidhka Komishanka Maamul-wanaaga iyo iyo Ururada Haweenka, si ay iskaga kaashadaan wacyigalinta Maamul-wanaaga ee uu waddo Komishanku.
3. Komishanka Maamul-wanaaga waxa lagula taliyey inuu qaaban-qaabiyo oo qabto Shirka wadatashiga Wacyigalinta Maamul-wanaaga ee Bulshada sannadkiiba ugu yaraan hal mar si la iskula fahmo ahmiyada Maamul wanaaga, lana wadaago figradaha lagu horumarinayo maamul-wanaaga.
4. Komishanka Maamul-wanaagu waa inuu xidhiidh dhow la yeesho Jaamacadaha dalka iyo Ururada bulshada si cilmi-baadhisyo madaxbanaan

(Warbixin Kooban)

looga sameeyo qaabka ugu wanaagsan ee bulshada loogu wacyigalin karo Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka musuqa.

5. Komishanka Maamul-wanaagu waa inuu xoojiyo Xafiisyada Wacyigalinta iyo Cabashooyinka si bulshadu u ogaato inay jirto hay'ad Dawladeed loo caban karo, si wax looga qabto musuqa, wax-isdabamarinta iyo ku-tagrifalka awoodeed ee lagu la kaco shaqaalaha dawladda, isla markaana looga wacyigalin karo maamul-xumadda.
6. Si loo xoojiyo arimaha wacyigalinta, Komishanka Maamul-wanaaga, Komishanka iyo Ururada Haweenka waa inay iska kaashadaan sidii kor loogu qaadi lahaa wacyigelinta maamul wanaagga iyo La-dagaalanka Musuqmaasuqa ee Xafiisyada Dawladda maadaama haweenka loo aqoonsaday inay ka musuqmaasuq yar yihiin ragga.
7. Komishanka Maamul-wanaagu waa inuu xoojiyo wada-shaqaynta uu la leeyahay bahda cadaalada, sida maxkamadaha, Xeer ilaalinta iyo Bilayska si loo hirgaliyo mabaadiida maamul-wanaaga
8. Madaxda Komishanka Maamul-wanaaga iyo kuwa Waaxda Garsoorku waa inay yeeshaan shirar wadatashi oo ujeedkoodu yahay horumarinta barnaamijyo tababar wacyigelin ah oo la siin karo masuuliyiinta iyo shaqaalaha ka hawlgala hay'adaha garsoorka.
9. Waxay ka qayb-galeyaashu soo jeediyeen, in Komishanka Maamul-wanaagu, isagoo kaashanaya Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka iyo Guddida Mihnadleyaasha Caafimaadka in baadhis lagu sameeyo dhakhaartiirta ajanabiga ah ee ka hawlgala dalka.
10. Ka qayb-galeyaashu waxay xukuumadda u soo jeediyeen inay xoojiso awooda fulineed ee Komishanka Maamul-wanaaga si uu dib-u-habayn dhinaca maamulka ah ugu sameeyo dhamaan hay'addaha qaranka.

6. SAWIRADA KULANKA DOORKA HAWEENKA EE WACYIGALINTA MAAMUL-WANAAGA



(Warbixin Kooban)



Qaar ka mid ah Haweenka ka qaybgalay dood-wadaaga



Qaar ka mid ah Haweenka ka qaybgalay dood-wadaaga

Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda Wacyigalinta Ee KMW

Website: www.ggc.govsomaliland.org

7. LIISKA MAGACYADDA KAQAYB-GALEYAASHA KULANKA

S/N	MAGACA	GOOBTA SHAQO	TILIFOONKA	EMAILKA
1.	Khadra Nuh Ismail	Nagaad	4419982	Khadranuh2019@gmail.com
2.	Habon Muse Hussein	SNHRC	4050589	Idilshiine12@gmail.com
3.	Sucaad Sh. Ahmed Osman	W. Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	4402931	Sucaadshahmed@gmail.com
4.	Yaasmiin Muuse Xassan	W. Warfaafinta iyo Wacyigalinta	4481172	Ymhdarajo1@gmail.com
5.	Amaal Abdirahman Mohamoud	W. Xidhiidh. Goleyaasha iyo Dastuurka	4298639	amalabdurahman@gmail.com
6.	Kawsar Mohamed Amin	W. Xidhiidh. Goleyaasha iyo Dastuurka	4156838	
7.	Hodan Jirde Maax	W. Maalgashiga iyo Wershada	4171668	Hodanjirde863gmail.com
8.	Asma Mohamed Farah	W. Maalgashiga iyo Wershadaha	4113373	asmamohamedfarah@gmail.com
9.	Deka Hassan Abdi	Frantz Fanon University	4141914	Dekaabdo45gmail.com
10.	Nafisa Yusuf	Agaasimaha Ururka Nagaad	4427496	nagaadorg@yahoo.com
11.	Hamda Mohamed Abdi	W. Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	4737205	hamditamoh@gmail.com
12.	Hoodo Ilyaas Maxamed	WIJA	4192435	Hoodo.ilyaas@gmail.com
13.	Hibo Adan Mohamed	WIJA	4066491	Hibom2527@gmail.com
14.	Faiza Mohamed Raage	MOAD	4421262	Faisarage19@gmail.com
15.	Suhaar Mohamed Abdilaahi	W.deegaanka iyo horurinta Reer Miyiga	4418787	khadrasuhaar@gmail.com
16.	Hibo Mohamed Ahmed	New Generation University	4067806	Hiboa225@gmail.com
17.	Ridwa Mohamed Ahmed	W. Isgaadhsiinta iyo Tignoljiyadda	4666425	Ridwa.mohamed466@gmail.com
18.	Sahra Aden Yusuf	Hay'adda Caysmiska Qaranka	4430887	sahramalow@gmail.com
19.	Hibak Mohamed Essa	w.Diinta iyo Awqafta	4010539	Hibaqmoho37@gmail.com
20.	Hodan Abdi Gaas	W. Diinta iyo Awqafta	4474846	Hodan.gaas1@gmail.com
21.	Ubah Esse Elmi	W. Cadaalada	4196905	Ubah439@gmail.com
22.	Nadiira Mohamed Ahmed	Admas University	4953599	Nadira.mhmed@gmail.com
23.	Khadra Yusuf Guleed	Komishanka Maamul-wanaaga	4125034	Axlaan123@gmail.com
24.	Yaasmiin Abdi Abdilahi	SWLA	402473	Yaasmiin cabdi45@gmail.com
25.	Sucaad Omer Xagaa	W.warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigalinta	4455929	Sucaad cumar226@gmail.com
26.	Deeqa Abdi Ahmed	SWLA	4463380	Deqaabdi95@gmail.com
27.	Sado Omer Ibrahim	SONYO	4465665	sonyoumbrella@gmail.com

Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda Wacyigalinta Ee KMW

Website: www.ggc.govsomaliland.org

(Warbixin Kooban)

28.	Hodo Mohamed Ahmed	SONYO	0633727741	Hodomohamed2013@gmail.com
29.	Ayan Yasin Jama	University of Hargeisa	4401864	
30.	Hibo Abdilahi Omer	Ururka NOW	4654313	
31.	Amina Mohamed Omer	Civil Service Institute	4519988	Rayaan2300@hotmail.com
32.	Hodo Mohamed Hassan	SONYO	4749919	Hodan120@gmail.com
33.	Muna Axmed Nur	Komishanka Maamul-wanaaga	4008910	
34.	Sucaad Sh Nuh Jama	Komishanka Maamul-wanaanaga	44664227	sucad.fo@gmail.com
35.	Shabcaan cismaan	GGC		
36.	Saynab Jamac	GGC		

Warbixintan Kooban waxa Diyaarisay Waaxda Wacyigalinta Ee KMW

Website: www.ggc.govsomaliland.org